

Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.


Diisambar 17, 2021

Ku socota: Dadka, qoysaska, daryeel bixiyayaasha iyo hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Qiyaasaha tallaalka ee xoojinta ah iyo ka ilaalinta naftaada ee COVID-19

Kuwo badan oo idinka mid ah ayay u badan tahay in ay maqleen hadda in nooca cusub ee walwalka leh ee COVID-19, [Omicron](#), la ogaaday in uu ka jiro Oregon.



Waxaanu haysanaa qalab si aan nafteena, qoysaskeena iyo bulshooyinkeena uga dhigno kuwo badbaado leh. Marka hore, haddii aad u qalanto tallaalka xoojinta ee COVID-19, [fadlan qaado qiyaastaada tallaalka ee xoojinta ah. Qof kasta oo da'diisu tahay 16 iyo ka weyn](#) ayaa qaadan kara qiyaasta tallaalka ee xoojinta ah lix bilood ka dib qiyaastooda labaad ee tallaalka. Tani waxaa ka mid ah dadka difaaca jirkoodu liito ee sidoo kale qaatay qiyaasta tallaalka oo saddexaad ee Pfizer ama Moderna. Dadka ay da'doodu tahay 16–17 ayaa kaliya u qalma in ay qaataan tallaalka Pfizer.

Maamulka Caafimaadka Oregon [galabkeeda helista tallaalka](#) ayaa kaa caawin kara in aad hesho tallaalo. Waxaa sidoo kale jira goobo la iska yimaado “pop-up,” oo ballan la’aan ah gobolka oo dhan. Halkan waxaa ku qoran liiska [goobahaasi tallaalka](#).

Maamulka Caafimadka Oregon (OHA) ayaa leh [foomka taageerada farsamo oo dhanka internet-ka ah](#) halkaasi oo daryeel bixiyayaasha, hay’adaha maamulka kiiska iyo dadku/qoysasku ay codsan karaan taageerada helitaanka tallaalka COVID-19 iyo tallaalada xoojinta ah. Gaar ahaan, foomkan waxaa loogu talagalay daryeel bixiyayaasha guryaha koox ahaanta loo degan yahay ee leh dad degan iyo shaqaale u baahan taageerada tallaalka, ama dadka helaya adeegyada guriga-dhexdiisa ee, sabab kasta ha ahaatee, aanan gurigooda ka bixi karin si ay u helaan tallaal.

Iyada oo shaqaalaha daryeelka bixiya uusan gobolku waqtigan la joogo uga baahnayn in uu qaato qiyaasta tallaalka ee xoojinta ah, waxaan qof kasta si aad ah ugu dhiirigelinayaa in uu qaato mid si aad u ilaaliso dadka aad taageerto, iyo sidoo kale naftaada, qoyskaaga iyo dadka aad wada shaqeysaan.

Sida ay sheegayso CDC, in la dhammeysto taxanaha tallaalka, oo uu ku jiro tallaal xoojin ah, ayaa ah iska ilaalinta ugu fiican ee COVID-19. Tallaabooyin kale oo muhiim ah waxaa ka mid ah, ku xirashada maaskaraha ee marka gudaha la joogo iyo goobaha bannaanka ku yaala ee la buux-dhaafiyay, kala fogaanshaha jir ahaaneed ee laga fogaanayo dadka kale, si joogta u dhaqista gacmaha iyo joogitaanka guriga marka la jiran yahay.

Aynu ka wada shaqeyno sidii aan nafteeda, dadka aan taageerno iyo bulshooyinkeena uga dhigi lahayn kuwo badbaado leh.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).